



Wax lacag ah ha ku bixin jidadka 32 & 62!

Adeegga Jidka 32 iyo Jidka 62 wax lacag ah lagaama qaadayo ilaa Diseembar 31, 2024.

- Mashiinada lacag uruurinta waa la dabooli doonaa
- Ka soo gal albaabada hore ama albaabla dambe jidadkan
- Haddii aad u gudubto jid kale, waxaad u baahan doontaa inaad iibsato tigidh

Barnaamijka Tijaabada ee Lacag la'anta ku raacida gaadiidka (Free Fare Pilot) waxaa looga baahan yahay biilka gaadiidka ee gobolka.

Sidee loo doortay jidadkan?

Jidadka 32 iyo 62 waxay caawiyaan dadka inay ku safraan bariga iyo galbeedka magaalada. Waxay sidoo kale u adeegaan meelaha ay ku badan yihiin dadka madow, kuwa asaliga ah, iyo Dadka Midabka leh, shakhsiyaadka dakhligoodu hooseeyo, iyo kuwa aan lahayn baabuurta.



Rakaabka isticmaala Metro Mobility waxay ugu safri karaan nidaamka oo dhan si lacag la'aan ah!

Inta lagu jiro barnaamijka tijaabada ah, dhammaan rakaabka ay ansixisay Metro Mobility waxay ku safri karaan jidadka caadiga ah ee gaadiidka dadweynaha iyagoon bixin wax lacag ah. Tan waxa ku jira basaska, leenanka METRO, iyo Northstar Commuter Rail. Kaliya tus kaarkaaga Metro Mobility ama a aqoonsiga ay dowladdu bixisay oo leh calaamada 'A' marka aad fuulayso oo safarkaaduna yahay mid bilaash ah!

Rakaab la ansixiyay waxay sidoo kale si bilaash ah ku raaci karaan Plymouth Metrolink, Maple Grove Transit, Minnesota Valley Transit Authority, iyo SoutWest Metro.

Ogsoonow: Rakaabka barnaamijka tijaabada ee lacag la'aan ku raacida Metro Mobility ma khusayso adeeg kasta oo la rabo oo ay ku jiraan, Transit Link, Metro Transit micro, Maple Grove My Ride, MVTA Connect, Plymouth Click-and-Ride, ama SW Prime.